

Heshiiska ayaa markii ugu horreysay la saxiixay 6 Febraayo 1840. Waxaa lagu qoray luqadda Maori, magaceedana waa **Te Tiriti o Waitangi**. Waa kuwan qodobbadii ugu waaweynaa ee lagu heshiiyey, oo ah afka Soomaaliga.

## SOO KOOBIDA HESHIISKA WAITANGI

### HORDHAC

Boqoraddu waxay doonaysaa in madaxda Maori iyo quruumaha New Zealand ay ilaashadaan dhulkooda iyo madax-banaanidooda, waxayna doonaysaa in dhammaan ay nabad ku wada noolaadaan. Heshiisku waa in dadkeeda hadda jooga New Zealand iyo kuwa mustaqbalka iman doona loo sameeyo guddoomiye.

### SADEXAAD

Boqoraddu waxay daryeeli doontaa dadka Maori waxayna siin doontaa xuquuq la mid ah tan dadka Ingiriiska.

### KOOWAAD

Hogaamiyayaasha Maori ayaa siinaya boqorada Ingriiska waligeed xaqa ay u leeyihiin in ay gudoomiye ku yeeshaan dhulkooda.

### LABAAD

Boqoradu waxay ogolaatay in Maori ay ilaashadaan madax banaanidooda iyo madax banaanida dhulkooda oo dhan iyo wax kasta oo iyaga muhiim u ah. Hogaamiyayaasha Maori waxay u ogolaadeen boqorada inay haysato qaybo dhul qiimo lagu heshiiyey hadii mulkiiluhu rabo inuu bixiyo.

### AFARAAD

(BALLANQAADKA HADALKA)

Guddoomiyuhu waxa uu ballan qaaday in uu ilaalinayo dhaqanka Maori iyo dhammaan diimaha New Zealand.



## SOO KOOBIDA

# HESHIISKA WAITANGI

Heshiiska ayaa markii ugu horreysay la saxiixay 6 Febraayo 1840. Waxaa lagu qoray luqadda Maori, magaceedana waa **Te Tiriti o Waitangi**. Waa kuwan qodobbadii ugu waaweynaa ee lagu heshiiyey, oo ah afka Soomaaliga.

## HORDHAC

Boqoraddu waxay doonaysaa in madaxda Maori iyo quruumaha New Zealand ay ilaashadaan dhulkooda iyo madax-banaanidooda, waxayna doonaysaa in dhammaan ay nabad ku wada noolaadaan. Heshiisku waa in dadkeeda hadda jooga New Zealand iyo kuwa mustaqbalka iman doona loo sameeyo guddoomiye.

## KOOWAAD KO TE TUATAHI

Hogaamiyayaasha Maori ayaa siinaya boqorada Ingriiska waligeed xaqa ay u leeyihiin in ay guddoomiye ku yeeshaan dhulkooda.

## LABAAD KO TE TUARUA

Boqoradu waxay ogolaatay in Maori ay ilaashadaan madax banaanidooda iyo madax banaanida dhulkooda oo dhan iyo wax kasta oo iyaga muhiim u ah. Hogaamiyayaasha Maori waxay u ogolaadeen boqorada inay haysato qaybo dhul qiimo lagu heshiiyey hadii mulkiiluhu rabo inuu bixiyo.

## SADEXAAD KO TE TUATORU

Boqoraddu waxay daryeeli doontaa dadka Maori waxayna siin doontaa xuquuq la mid ah tan dadka Ingiriiska.

## AFARAAD (BALLANQAADKA HADALKA)

Guddoomiyuhu waxa uu ballan qaaday in uu ilaalinayo dhaqanka Maori iyo dhammaan diimaha New Zealand.



## FARQIGA U DHEXEeya TE TIRITI O WAITANGI EE MAORI IYO DUKUMEENTIGA INGIRIISIGA

Boggani wuxuu muujinayaa qodobbada ugu muhiimsan ee dukumeenti kasta

	TE TIRITI O WAITANGI	DUKUMEENTIGA INGIRIISIGA
<b>QODOBKA KOOWAAD</b>	Hogaamiyayaasha Maori ayaa siinaya boqorada Ingiriiska waligeed xaqa ay u leeyihiin in ay gudoomiye ku yeeshaan dhulkooda.	Hogaamiyayaasha Maori ayaa siinaya boqorada madax banaanida New Zealand.
<b>QODOBKA LABAAD</b>	Boqoradu waxay ogolaatay in Maori ay ilaashadaan madax banaanidooda iyo madax banaanida dhulkooda oo dhan iyo wax kasta oo iyaga muhiim u ah. Hogaamiyayaasha Maori waxay u ogolaadeen boqorada inay haysato qaybo dhul qiimo lagu heshiiyey hadii mulkiiluhu rabo inuu bixiyo.	Boqoraddu waxay dammaanad qaadaysaa dhammaan xuquuqda Maori ee dhulka, kaymaha iyo kalluumaysiga. Haddii Maori ay rabaan inay iibiyaan dhulkooda, way ka iibin doonaan oo keliya boqoradda.
<b>QODOBKA SADEXAAD</b>	Boqoraddu waxay daryeeli doontaa dadka Maori waxayna siin doontaa xuquuq la mid ah tan dadka Ingiriiska.	Boqoraddu waxay ilaalin doontaa Maori waxayna siin doontaa xuquuq la mid ah tan mowadinka Ingiriiska.
<b>QODOBKA AFARAAD (BALLANQAADKA A HADALKA)</b>	Guddoomiyuhu waxa uu ballan qaaday in uu ilaalinayo dhaqanka Maori iyo dhammaan diimaha New Zealand.	

### MIDKEE AYAA DHAB AHAANTII AH HESHIISKA?

TE TIRITI O WAITANGI	DUKUMEENTIGA INGIRIISIGA
Oo ay saxeexeen in ka badan 500 oo hoggaamiye Maori ah iyo guddoomiyaha Ingiriiska oo wakiil ka ah boqoradda.	Waxaa saxiixay 39 hogaamiye oo Maori ah.
Kani waa heshiiska uu taageeray sharciga caalamiga ah. Sharciga caalamiga ahi waxa uu mudnaanta siinayaa qoraalka maori marka loo eego xeer loo yaqaan <i>contra proferentem</i> . Taas macneheedu waxa weeye marka qandaraasku aanu caddayn, waa in loo fasiraa dhinacii qandaraaska bixiyay.	Kani waa heshiiskii Ingiriisku rabay. Dawladda New Zealand waxay awooddeeda ku salaysay noocan.
Heshiiskani waxa uu aqoonsaday madaxbanaanida Maori ee New Zealand.	Dukumeentigani waxa uu sheegayaa in Maori ay siisay dawladdnimada boqoradda.



# Muxuu Heshiiska Waitangi muhiim ugu yahay qof kasta oo ku nool New Zealand?

Maori waa dadka ugu horreeya ee New Zealand. Waxay isku magacaabaan tangata whenua - dadka dhulka.

Heshiiska Waitangi wuxuu ku qoran yahay luqadda Maori, waxaana loo yaqaan Te Tiriti o Waitangi.

Heshiiskii Waitangi, Maori waxay u oggolaadeen dadka cusub in ay halkan degaan, ilaa inta ay degayaashu ixtiraamayaan madax-bannaanida, dhulka, luqadda, iyo dhaqanka Maori.

Dhammaanteen dadka halkan dagey waxaynu isku yeeri karnaa tangata tiriti - dadka Heshiiska.

Tani waa sababta aan ugu baahanahay inaan fahamno oo aan ixtiraamno Heshiiska Waitangi.

# Ma doonaysaa in aad wax badan ka ogaato Heshiiskii Waitangi?

Nagala soo xidhiidh [treatypeople@gmail.com](mailto:treatypeople@gmail.com) si aad u ballansato maalin waxbarasho oo bulshadaada loo qabanayo Heshiiska Waitangi.

# Soo dejiso qoraal kooban oo ku saabsan Heshiiska Treaty oo ku qoran af-Soomaali

 [www.treatypeople.org/languages](http://www.treatypeople.org/languages)


Noogu soo dir iimayl si aad u dalbato waraaqo daabacan si aad ula wasdaagto bulshadaada.

 [treatypeople@gmail.com](mailto:treatypeople@gmail.com)

**TREATY**  
FOR EVERYONE

Te Tiriti o Waitangi | Somali

# Heshiiska Waitangi oo lagu fasirey luuqadeena



Waxaad wax ka baran kartaa Heshiiska Waitangi af-Soomaali ee bulshooyinka, dugsiyada iyo qoysaska

**Aqoon isweydaarsi | Muuqaalo | Soo dejiso**



Tangata Tiriti - Treaty People Education Programme